



Carruurta oo waalidiintu mudnaanta siiyaan (BIFF)

**Waxbarasho waalidiin oo loogu talo galay waalidiinta kala
tagay ee is khilaafsan**

Carruurta oo waalidiintu mudnaanta siiyaan

Sidee waalidiintu ilmuhu ka dhexeeyaan xiriirkoodu u hagaagi karaa kala tagga kaddib? Ma rabtaa caawinaad ama inaad wax kasii baratid siday u saamaynaso ilmaha lasoo kulmay, ama ku sugan xaalad waalidiin is khilaafsan?

Inta waxbarashada lagu gudajiro waxaan ka duulaynaa su'aasha ah:

"Maxaan waalid ahaan samayn karaa si aan wax ugu fududeeyo ilmahayga"?

Ilmaha oo mudnaanta la siiyo

Carruurta la nool waalidiinta kala tagay ee is khilaafsan waxay badanaa ku fikiraa oo dareen ka qabaan xaaladda ay ku sugan yihiin. Waxaa dhici karta inuu ilmuhu is yiraahdo adiga ayaa dembigeeda lahaa inay waalidiintaa kala tagaan ama in ilmuhu uu dareemo mas'uuliyad inay ka saaran tahay inuu sasabo waalidiintiisa oo uu dhexdhexaadiyo khilaafyada dhex mara.

Waxbarashadaan waxay kugu caawinaysaa inaad aragtid baahida iyo xaaladda ilmahaaga. Waxaan ka duulaynaa dhanka ilmaha in laga eego, xuquuqda ilmaha, cilmiga iyo cilmi baarista ku saabsan oo ka wada hadalno waxa la samayn karo ee keeni kara in xaaladdu ay noqoto mid si fudud loo maarayn karo ilmahaaguna ay fahmi karaan.

- Saddex/afar kulan oo weliba kan kale ku dhisan yahay (la xiriiro).
- Waalidiinta ilmuhu ka dhexeeyaan waxay ka kala tirsanaan doonaan kooxo (kulamo) kala duwan.
- Koorsada waa bilaash waxaana idinku casumaynaa qaxwe.

